

## iyo Naafooyinka koriimada (DD)

Nafooyinka koriimada (DD) waa koox xanuuno ah oo ka dhasha naafada jirka, waxbarashada, luuqada, ama aaga habdhaqanka. Ku dhawaad hal kamid lixdii carruur ah oo ku nool Mareykanka ayaa leh hal ama ka badan oo naafooyinka koriimada ah ama dib u dhacyada kale ee koriimada, ayaa keeni kara qofka dhibato dhanka waxbarashada iyo koriimada ah marka loo eego xanuunka ama naafada dadka kale.

### Si aad ugu qalanto adeegyada lagu baxsho OPWDD:

- Caqaqabadaha waawayn ee yareynaaya awoodooda shaqada marka loo eego dadka facood ah ee aan naafada qabin.
- Waa inuu naafo noqday kahor da'da 22 sano lagana helay:
  - Naafada Caqliga
  - Baralaatiga
  - Qalalka
  - Dhakaaha (Autismka)
  - Xanuunka Neerfaha ee Qoyska
  - Pradar Willi
  - Xanuunka Khamriga ee loo Dhinto
  - Naafada neerfaha
  - Xanuun kasta oo kale kaasoo keenaaya naafada shaqada guud ee ee garaadka ama habdhaqanka la qabsiga.

### Carruurta laga bilaabo dhalashada ilaa da'da todobo (7)

- Uma baahna in xanuun gaar ah laga helo.
- Waxay u baahan yihiin 12 bilood oo dib u dhaca midkood ama ka badan hawlaha soo socda:
  - koriimada Jirka, garaadka, luuqada, bulshada iyo la qabsiga.
  - 33% oo dib u dhaca mid kamid ah aaga shaqada ama 25% dib u dhaca labo kamid ah aagaga shaqada. Tusaale, ilmaha waxaa ku dhici doona dib u dhacyo waawayn oo labada ah dhanka koriimada hadalka iyo dhaqdhaqaaqa.
  - Buundooyinka imtaxaanka oo buuxinaaya shuruudaha gaarka ah (2 farqiyada tirada ah oo ka hooseeya celceliska hal aaga shaqada ah ama isku weerka 1.5 farqiyada cabirka ah oo ka hooseeya celceliska labo aagaga shaqada ah).
  - Waxaa dib u qiimeynta u qalmida lagu samayn doonaa markuu gaaro da'da todobo (7).

### Ma ogtahay?

- In ka badan 6 milyan oo qof oo ku nool Mareykanka ayaa qaba naafooyinka koriimada.
- Naafooyinka koriimada ayaa ka duwan "dib u dhacyada koriimada," kaasoo muujinaaya inuusan qofku lahayn midkood ama ka badan dhinacyada koriimada ama xirfada.
- Xafiiska Dadka qaba Naafada koriimada (OPWDD) ee Gobalka New York ayaa masuul ka ah inuu isku dubarido adeegyada in ka badan 126,000 dadka reer New York oo qaba naafooyinka koriimada, ayna ku jirto naafada caqliga, autismka, xanuunka maskaxda, qalalka, xanuunka Neerfaha ee Qoyska iyo naafada neerfaha \*dhaawaca, shaqo gabka, ama cudurka quseeya nidaamka dhexe ee neerfaha).

# Xafiiska Dadka qaba Naafada koriimada (OPWDD) iyo Naafooyinka koriimada (DD)

## Adeegyada OPWDD

### Albaabka Hore

Si aad u hesho adeegyada iyo caawimaad aad ka hesho gobalka New York oo ku aadan daryeelida ilmo ama qof wayn oo naafo qaba, waxaad u baahan tahay inaad tagto "Albaabka Hore." Albaabka Hore waa xarunta Gobalka New York ee dadka doonaaya adeegyada qof qaba naafooyinka garaadka iyo koriimada.

### Ururada Isku Dubarida Daryeelka (CCO's)

Ururada Isku Dubarida Daryeelka (CCO's) ayaa isku dubaridi kara labadaba adeegyada guriga iyo kuwa bulshada ee shaqsiyaadka naafada ah iyo sidoo kale adeegyada caafimaadka iyo faya dhawrka.

### Taageerada

Waxaa jira taageerooyin ay heli karaan dadka la ogaado inay u qalmaan adeegyada lagu baxsho OPWDD. Adeegyadaan ayaa loo naqshadeeyay inay ka caawiyaan dadka naafada koriimada qaba inay ku filnaadan noloshooda, waxyaabo cusub bartaan, ay shaqo helaan, ayna ku biiraan nashaadaadka dalxiiska.

### Shabakada Waalidka ee Barnaamijyada Taageerooyinka Qoyska ee WNY

- U qalmida
- Taageerada Dabeecada Qoyska
- Taageerada Qoyska iyo Barnaamijka U doodista
- Aqoon Kororsiyada Waxbarashada Waalidka

### Hadba inta Aad sii Barato

- Qorshaha Noloshu waa qorshe daryeel oo qofka diirada saaraaya kaasoo aad u faahfaahsan kaasoo la socon kara dhammaan baahiyaha adeegga. Si joogto ah ayaa dib u eegis loogu samaynayaa (*ugu yaraan labo jeer sanadkii*) waxaana wax laga badelaa marka loogu baahdo yoolalka nolosha qofka iyo baahiyaha isbadelaaya.
- Dadka qaba naafada koriimada ayaa ka faa'iideysta adeegyada balaaran ee mudada dheer. Adeegyadaan ayaa ka caawiya dadka naafada ah inay yeeshaan wax soo saar badan iyo madax banaani.

*Dookhyada iyo xogta ay bixinayso*

*-[www.opwdd.ny.gov](http://www.opwdd.ny.gov)*

*-[cdc.gov/features/dsdev\\_disabilities](http://cdc.gov/features/dsdev_disabilities)*

*-[ici.umn.edu](http://ici.umn.edu)*

*Booqo [parentnetworkwny.org](http://parentnetworkwny.org) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.*